



dheh: Iaa Ilaaha Ilaa Allaah, aan kuu marag furo maalinta Qiyaamee

Abii Hurayra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay wuxuu ku yiri Adeerki ((dheh: Iaa Ilaaha Ilaa Allaah, aan kuu marag furo maalinta Qiyaamee)), wuxuu yiri Adeerki hadayna qurayshi igu ceebayn lahayn oo aysan oronayn: waxaa ka keenay cabsi waan oron laha oo kaaga farxin lahaa, Ilaahay ayaa soo dajiyey: {Adigu ma hanuunin kartid qofkaad jeceshahay, laakiin Ilaahay ayaa hanuuniya qofkuu doono}: [Alqasas: 56].

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu ka codsaday adeerki Abii Daalib isagoo sakaraadkii geerida ku jira, inuu ku dhawaaqo shahaadada, si uu ugu shafeeco maalinta qiyaamaha, oo uga markhaati koco inuu Islaamay, wuu diiday inuu ku dhawaaqo shahaadada, isago ka baqaya in qurayshi ku caydo, oo ku tiraahdo wuxuu u Islaamay ka baqid dhimasho iyo taagdaro! wuxuu ku yiri Nabiga scw: hadayna taasi jirin qalbigaaga waa uga farxin lahaa shahaadada, waxaanan ku tusi lahaa waxaad jeceshahay ilaa aad raali noqoto!, Ilaahaybaa soo dajiyey aayada sheegaysa in Nabigu scw uusan lahayn hidaayada towfiiqda Islaamka, balse Ilaahay casa wajala kaligi ayaa waafajiya cidii uu doono. Nabigu scw ummdda wuxuu ku hanuuniya hidaayada dalaalada, Cadyntha, hanuunita iyo inuu jidka toosan dadka ugu yeero.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65069>